

Cudurka Lymphogranuloma Venereum (LGV)

(waxaa sababa 3 noocyo hoose ee *Chlamydia trachomatis*, ilmaqabato)

OGOW: LGV waa mid aad ugu yar Maraykanka. Haddii aad isku aragto calaamada iyo saansaan cudurrada galmada laga qaado, waxaa kugu haboon in aad la xiriiird daryeelka caafimaadka si baartaan laguugu sameeyo laguuna daaweeyo.

CALAAMADAHA IYO SAANSAANTA XANUUNKA

Heerka bilowga saansaan xanuuna qofka LGV qaba:

- Bilowga 3–12 cisho ama ka badan marka cudurka la qaado
- Calaamada hore inta badan lama dareemayo amaba ma dhacaan
- Nabarro ama is baddal kasta ee ka soo baxaya agagaar ka saxaaxa ama dabada
- Nabarradu waxay kaloo ka soo bixi karaan cunaha marka galmada afka la sameeyo
- Nabaraddu maalmo yar gudahood ayay ku biskoonayaan

Marxalada dambe ee calaamadaha bukaanka ee LGV qaba:

- Bilowda 2–6 toddobaad ama ka badan halka cudurka ka bilowday
- Qanjirada gumaarka oo ka barara hal dhinac ama labada dhinacba
- Xanuun uu jiro marka la kaadinayo ama la saxaroonayo
- Caloosha oo fariisato
- Malawadka oo dhiig ka yimaado
- Xanuun ka jira caloosha hoose ama dhabarka
- Shuban ay malax iyo dhiig ka buuxdo
- Qandhada, qarqaryo, xanuunka kalagoosyada, cuntada oo laga go'o iyo daal

ISQAADSIINTA

LGV waxaa laysku qaadsiiya:

- Galmada siilka
- Galmada afka
- Galmada dabada

CILLADAHA

Haddii aan la daawayn, LGV waxa uu noqon karaa:

- In la qaadsiiyo dadka lala galmoodo.
- Sababa dhaawac iyo foolxumo ba'an ku rida xubanaha taranka.
- Sababa dhaawac ba'an malawada kaaso isusoo xirmaa.
- Dumarku, waxa uu isku furayaa siilka iyo dababada (fistula).
- Unogyada maskaxda oo caalir (marar dhifa).

KA HORTAGISTA

- Laga fogaado galmada siilka, afka, dabada waa si uga wanaagsan ee STDs looga hortagayo.
- Komdomka caagga ah, marka sidii loogu tala galay iyo sida saxda ah loo isticmaalo, waxa uu yarayn karaa halista in LGV la qaado marka meelaha jirran la daboolo ama komdomka la isticmaalo.
- Komdomka caaga markasta la isticmaalo marka galmada siilka ama dabada la samaynayo.
- Kondomka caagga guska lagu xirto u isticmaal galmada afka.
- Caag ku difaacayo (wax ilkaha difaaca ama komdom dhaxda laga gooyay) galmada afka, siilka ama dabada loo isticmaalo.
- La yareeyo dadka lala galmoodo.
- Sida u dhaqsa badan loogu sheego dadka lala galmoodo haddii aad caabuqdo.
- La hubiyo in dadka lala galmoodo la baaray iyo in la daaweyay.

BAARITAANKA IYO DAAWAYNTA

- Baaritaan shaqaalaha caafimaad haa qaado haddii caabuq la tuhmo.
- LGV waxaa lagu daawayn karaa ayadoo daawada uu dhakhtar soo qoray la qaato.
- Dadka lala galmoodana waa in isla markaa ayagana la daaweeyo.

Ogow: Qofka laga daaweeyay mar kale ayuu caabuqa qaadi karaa.

MACLUUMAAD DHEERAADA, LA XARIIR:

Minnesota Department of Health
STD and HIV Section
(Waaxda Caafimaadka Minnesota)
(Qaybta STD iyo HIV)
(651) 201-5414; (651) 201-5797 TTY
www.health.state.mn.us/std

Minnesota Family Planning and STD Hotline
(Qorshaynta Qoyska Minnesota iyo Khadka STD)
1-800-783-2287 Codka/TTY;
(651) 645-9360 (Magaalada iyo Degaanada)
www.sexualhealthmn.org

American Social Health Association (ASHA)
(Iskaashtada Caafimaadka Bulshada American ka - ASHA)
www.ashastd.org

CDC National STD and AIDS Hotlines
(CDC National STD iyo Khadka AIDS ka)
1-800-CDC-INFO; 1-888-232-6348 TTY
www.cdc.gov/std